



## XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

### Faafin Degdeg ah

### WARSAXAAFADEED 35/2014

## **Ergeyga Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo soo dhoweeyay heshiiska ku talagalka maamul cusub loogu sameynayo gobollada dhexe ee Soomaaliya**

**Muqdisho**, 30 July 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay, ayaa soo dhoweeyay heshiiska maanta la gaaray in mabda’ ahaan maamul goboleed loogu sameeyo gobollada dhexe ee Soomaaliya.

Iyadoo ay garwadeen ka tahay Dowladda Federaalka, wakiillo ka socda gobollas ayaa saxiixay heshiis qoraal ay ku caddeeyeen inay ka wada shaqeyn doonaan sidii maamul cusub loogu sameyn lahaa gobollada dhexe ee Soomaaliya. Xafladda lagu saxiixayay heshiiska waxaa goobjoog ka ahaa Wakiillo sarsare oo ka kala socda Midowga Afrika, Midowga Yurub, Urur-Goboleedka IGAD iyo Qaramada Midoobay.

“Inkastoo ay tahay tallaabadii ugu horeysay keliya ee loo qaaday geeddi-socodka maamul u sameynta gobollada dhexe ee Soomaaliya, haddana tani waxay tusaale u tahay horumarka dalku ku tallaabsaday siduu u gaaro yoolalka ku degsan Tiigsiga (Vision) 2016 iyo Dastuurka Federaalka Ku Meelgaarka,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay. “Ujeeddada hanaanka federaalaynta dalka waa in la dhiso Soomaaliya oo xoog leh, aad u midaysan, nabadna ah.”

“In maamul loo wada dhanyahay laga dhiso gobollada dhexe ee Soomaaliya ma ahaan doonto caqabad la’aan, laakiin caqabadahaas waxaa lagu xallin karaa keliya in la yeesho wadatashi, wadahadal iyo wadaxaajood ay ka wada qaybgalaan dhammaan dhinacyada,” ayuu raaciyay. “Waxaan si gaar ah ugu baaqayaa inay haweenku si buuxda uga qaybgalaan hanaanka. Waxaa sidoo kale aad u muhimsan in marka maamul goboleedka la sameynayo la ilaaliyo danaha maamullada hadda dhismaya iyo kuwa horeyba u jirey.”



## XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

“Qaramada Midoobay, oo goobjoog ka ahayd heshiiska maanta la gaaray, waxaa ka go’an inay taageerto dadaalka Dowladda Federaalka ay ugu jirto nabadaynta iyo dowlad-dhisidda,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay.

Dhamaaad.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique

Tel: +254 41 350 6603 • Email: [unsom-spokesperson@un.org](mailto:unsom-spokesperson@un.org)

*Fadlan eeg rugta Internet-ka:*

[www.unsom.unmissions.org](http://www.unsom.unmissions.org) • [@UNSomalia](https://www.facebook.com/UNSomalia) • [facebook.com/UNSomalia](https://www.facebook.com/UNSomalia)